

Jadwalka Nadiifinta

Tilmaamaha loogu talagalay Deegaanka Nadiifka iyo Caafimaadka leh ee Daryeelka Carruurta

Hawsha	Ka nadiifi jeermiska	Ka dil jeermiska	Maalinle	Toddob aadle	Kahor & Kadib Isticmaal Kasta	Faallooyinka:
Goobaha Daryeelka Carruurta						
Meelaha gacanta laga qabsado Albaabka & Armaajada		X	X			Dhammaadka maalinta.
Ilaha biyaha laga cabo		X	X			
Alaabta carruurta ku ciyaarto ee ay afka gelyaan	X				X*	Laga soo bixiyo in la isticmaalo kadib marka afka lagaliyo, kadibna la nadiifiyo oo jeermiska nadiifiyaha la mariyo kahor inta aanan dib loo isticmaalin.
Cinjirada ilmaha nuugaan	X		X*			Waa in lagu nadiifiyaa saabuun iyo biyo inta u dhaxeysa isticmaalada isla halka canug. Jeermiska laga nadiifiyo midkood iyadoo biyo kulul lagu karkarinayo ama lagu dhaqaayo mashiinada ootomaatiga u dhaqa halmar maalintiiba. Cinjirada ilmaha nuugaan waa inaan marnaba la isla wadaagin.
Maryaha alaabta ilmuuhu ku cayaaraan iyo dharka labiska	X			X		Jeermiska looga nadiifiyo warankiilada si waafaqsan tilmaamaha shirkada soo saartay qalabka ama lagu dhaqo heerkul ka sarreeya 140° F.
Koofiyadaha & koofiyadaha xargaha leh	X				X	Ka dib isticmaalka ilmo kasta.
Alaabta ay ku ciyaaraan dhallaanka & kuwa socod baradka	X		X*			
Alaabta ay ku ciyaaraan ilmaha dugsiga kahor iyo kuwa da'da dugsiga gaaray	X			X*		Jadwalka nadiifinta oo u gaar ah goobta waa in la sameeyaa oo la raacaa.
Miisaska biyaha	X				X	
Alaabta suufka ku cufeysan				X*		Nadiifi ugu yaraan labo jeer sanadkiiba adigoo isticmaalaayo mashiinka shaambada rooggaa ama nadiifiyaha uumiga.
Weelasha qashinka		X	X*			
Katiifadaha & roogaga			X*			Qalabka tirtiraha oo lagu nadiifiyo marka aysan carruurtu joogin. Nadiifi ugu yaraan halmar 6dii biloodba adigoo isticmaalaayo mashiinka shaambada rooggaa ama nadiifiyaha uumiga. Qolalka ilmaha dhallaanka, nadiifi ugu yaraan bishiiba halmar.

Hawsha	Ka nadiifi jeermiska	Ka dil jeermiska	Maalinle	Toddob aadle	Kahor & Kadib Isticmaal Kasta	Faalooyinka:
Sagxadaha dhulka (mutuleelka, shumaca, iwm.)	X*		X			Xaaq ama ku tirtir qalabka tirtiraha, kadib ka nadiifi jeermiska .
Sagaxadaha dhulka ah, roogaga, katiifadaha ama meelaha leh dheecaanada jirka ama calyada		X	X*			Carruurta waa in laga wadaa goobta ku wasakheysan dhiigga ama dheecaanada kale ee halista ah ee OPIM kahor nadiifinta iyo jeermis ooga dilidda kuleyl aad u sarreya ama daawo ka diiwaangashan Environmental Protection Agency (EPA, Hay'adda Ilaalinta Deegaanka). Carruurta waa inaysan ku laaban meelaha rooggaa leh ilaa ay ka galalaan.
Goobaha Seexashada						
Sariiraha geesaha leh, sariiraha fidsan & darimaha	X			X*		Nadiifi oo Ka nadiifi jeermiska kahor inta uusan isticmaalin canug kale.
Dhar-dhaqashada - Gogosha: go'yaasha, bustayaasha, maryaha jiifka, iwm.	X			X		Waa in lagu sameeyaa goobta ama uu sameeyaa adeeg ganacsi (sida. inaan lagu dhaqin guri gaar ah). Jeermiska looga nadiifiyo warankiilada si waafaqsan tilmaamaha shirkada soo saartay qalabka ama lagu dhaqo heerkul ka sarreya 140° F.
Goobaha Musqulaha iyo Xafaayadda						
Meelaha gacmaha lagu dhaqdo ee biyaha hoos kabaxaan, miisaska, musqulaha, gacan qabsiyada musqulaha, & sagxadaha dhulka		X	X*			Isla markiiba nadiifi haddii ay wasakh ka muuqato.
Miisaska beddelka		X			X	Isticmaal kasta kadib.
Tuunjiyada		X			X	Isticmaal kasta kadib.
Haamaha qashinka xafaayadda		X	X			La faarujiyo maalinti oo dhan.
Sagxadaha dhulka ee musqulaha		X	X*			Jeermis dilaha looma isticmaalo sagxadaha dhulka dushiisa ah marka carruurta ay joogaan.
Goobaha Cuntada						
Firinjeerka/qaboojiyaha	X			X		Nadiifinta iyo jeermis ka nadiifinta firinjeerka bil walba waa CAADI. Ka nadiifi barafka marka in kabadan $\frac{1}{4}$ inji oo baraf ah uu sameysmo ama heerkulka uu dhaafo 0° F
Maacuunta wax lagu cuno, dhalooyinka, & saxamaha	X				X	Isticmaal kasta kadib.
Miisaska jikada	X				X*	
Meelaha cuntada lagu diyaariyo dushooda	X				X	

Hawsha	Ka nadiifi jeermiska	Ka dil jeermiska	Maalinle	Toddob aadle	Kahor & Kadib Isticmaal Kasta	Faallooyinka:
Meelaha cuntada lagu diyaariyo ee biyaha kasii baxaan	X		X			
Agabka jikada: makiinada wax lagu shiido, qalabka lagu furo qasacadaha, digsiyada & bir taawada, miisaska wax lagu jarjaro	X				X*	Isticmaal kasta kadib.
Miisaska & kuraasta miisaska sare leh	X				X	
Kuraasta sare	X		X			
Sagxadaha dhulka ee jikada	X		X			La xaaqo, la dhaqo, la biyo raaciyo oo jeermiska laga nadiifiyo.

Waxyabaha kale ee Nadiifinta

Xaaqimada		X	X			Lagu nadiifiyo, lagu biyo raaciyo oo jeermiska looga dilo weelka biyaha hoos loogaliyo. Hawada lagu qalajiyo goob hawada bannaanka ooga baxeysyo & oo aysan ilmiyu gali karin.
Dhar-dhaqashada - Dharka canuga luqunta loogu xiro ee ka ilaaliya cuntada & dhareerka	X				X	Jeermiska looga nadiifiyo warankiilada si waafaqsan tilmaamaha shirkada soo saartay qalabka ama lagu dhaqo heerkul ka sarreeya 140° F.
Buufi dhalooyinka saabuunta, biyo raaci & oo ku dar milanka warankiilada		X	X			Ka eeg Habraaca Diyaarinta Milanka Bilanka Warankiilada meesha laga nadiifiyo dhalooyinka.
Alaabaha xayawaanka rabaayaddaa						Ka eeg shuruucdaada xayawaanka dab-joogga ah. Haweenka uurka leh & carruurta waa inaysan nadiifin xeryaha xoolaha, aysan soo daadin sanduuqyada qashinka, aysan nadiifin haamaha kalluunka, iwm.

Habka 3-da Tallaabo ayaa ah 1. DHAQ, 2. BIYO RAACI, oo 3. KA NADIIFI JEERMISKA ama KA DIL JEERMISKA

- **Daawada nadiifinta jeermiska** waxaa loo isticmaalaa in jeermiska looga yareeyo meelaha dushooda laakiin ma ahan inay gabii ahaanba baabi'iyaan. **Nadiifiayaasha jeermiska** waxay jeermiska ka yareeyaan meelaha dushooda ilaa heer badbaado loo arko. Habka **nadiifinta jeermiska** ee 3-da tallaabo ah waxaa inta badan loo isticmaalaa meelaha cuntada dushooda, jikada, iyo fasallada.
- **Daawada Jeermiska disha** waxaa loo isticmaalaa in lagu baabi'iyo ama hawl gab looga dhiga jeermiska waxayna kahortagaan inay koraan. **Jeermis dilayaasha** waxaa maamula U.S. Environmental Protection Agency (EPA, Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka). Habka **Jeermis dilka** ee 3-da tallaabo ah waxaa inta badan loo isticmaalaa dheecaanada jirka iyo goobaha musqulaha/xafaayadda.

***Mararka ay lagama maarmaan noqoto in la nadiifiyo, biyo raaci oo jeermiska ka nadiifi/ka dil marar badan.**